



## YAA U QALMO?

### DADKA DEGAN EE DAQLIGA HOOSEYO EE AH:

- Naagaha uurka ah iyo ilmaha;
- Carruurta da'dooda 1-18;
- Waaladiinta iyo qaraabada ee qaraabada la ah carruurta ku tiirsan; ama
- Dadka weyn ee da'dooda ah 19-64, ee aanan uur aheyn oo aanan u qalmin Medicare.

Caafimaadka Gobolka NY waxay u hogaansanaataa sharciyada xaquuqda madaniga Federaalka ee quseeya oo kuma takoorto si ku saleysan qowmiyada, midibka, asalka dhalashada, jinsiga, da'da ama curyaanimada ee ku jiro barnaamijkooda caafimaadka iyo holwaha.

# Medicaid Ee Millicsiga

## MAXAA KU DABOOLAN?

- Bukaan jifka isbitaalaka iyo adeegyada bukaan socodka
- Adeegyada xarunta caafimaadka
- Baaritaanka hore, baaritaanka, iyo daaweynta carruurta ka hooseeyo 21 sanno jir da'da ah sida waafaqsan Barnaamijka Caafimaadka Carruurta/Dhalaanka
- Daawada, saadadka, qalabka caafimaadka, iyo qalabka sida gaariga curyaanka, iwm.
- Sheybaarka iyo adeegyada raajada
- Ka hortaga daryeelka caafimaadka iyo ilkaha iyo daaweynta ee dhaqaatiirada iyo dhaqaatiirta ilkaha
- Daryeelka kalkaalinta guriga
- Daryeelka dhinaca hay'adaha caafimaadka guriga iyo daryeelka gaarka ah
- Daaweynta ku jirto isbitaalada damiirka (oo dadka ka hooseeyo 21 ama kuwa 65 iyo ka weyn), xarumaha caafimaadka maskaxda, iyo xarumaha maskax ahaanta ah hoos u dhacday ama hormarka curyaamay
- Adeegyada qorsheynta uurka qoyska
- Gaadiidka u socdo balamaha caafimaadka, oo ay ku jiraan gaadiidka bulshada iyo gaariga masaafada baabuurta
- Gaadiidka ambalaansaha degdega ee isbitaalada u socdo
- Joojinta waxyaabaha siigaar cabida sida xanjada iyo sharootada

Qaar ka mid ah adeegyada laga yaabo inaan lagu daboolin sababtoo ah da'da, xaaladaha dhaqaalaha, xaalada qoyska, ama ku noolaanshaha diyaarinada. Qaar ka mid ah adeegyada waxay yeelan karaan lacag bixinta caymiska oo yar. Ma heleysid lacag bixinta caymiska haddii aad ku jirtid qorshaha daryeelka la maamulo, marka laga reebo lacag bixin caymiska yar ee adeegyada farmashiga.

## NAGALA SOO XIRIIR

[nystateofhealth.ny.gov](http://nystateofhealth.ny.gov) | 1-855-355-5777 ama TTY 1-800-662-1220

# Sidee ayaan ku garanayaa haddii daqligeyga iyo illaha ay ii qalmaan ee Medicaid?

Jadwalka hoose wuxuu muujinayaa inta daqliga ah ee aad heli kartid sannadlaha oo weli u qalma Medicaid.\*

Heerarka daqliga waxay ku saleysanyihiin inta xubnood ee qoyska ee adiga kula nool.

Heerarka Daqliga Sannadlaha 2018				
Cabirka Qoyska	Waaladiinta/Daryeelayaasha <i>ama</i> Lamaanayaasha Carruur la'aanta Kaliga ah <i>ama</i> Qofka weyn ee da'da 19 iyo 20 ee aanan la nooleyn waaladiinta	Carruurta Da'da 1 - 18	Dadka weyn da'da 19 iyo 20 ee la nool waaladiinta	Naagaha Uurka, Ilmaha Ka hooseeyo Da'da 1, <i>ama</i> Shaqsiyaadka U qalma Faa'idooyinka Qorsheynta Qoyska
	Boqolkiiba 138% ee FPL	Boqolkiiba 154% ee FPL	Boqolkiiba 155% ee FPL	Boqolkiiba 223% ee FPL
1	\$16,754	\$18,696	\$18,817	\$27,073
2	\$22,715	\$25,349	\$25,513	\$36,706
3	\$28,677	\$32,002	\$32,209	\$46,340
4	\$34,638	\$38,654	\$38,905	\$55,973
5	\$40,600	\$45,307	\$45,601	\$65,607
6	\$46,562	\$51,960	\$52,297	\$75,241
7	\$52,523	\$58,613	\$58,993	\$84,874
8	\$58,485	\$65,266	\$65,689	\$94,508
9	\$64,446	\$71,918	\$72,385	\$104,141
10	\$70,408	\$78,571	\$79,081	\$113,775
Dheeraadka Qofka	\$5,962	\$6,653	\$6,696	\$9,634

\* Iyadoo ku salaysan 2018 Heerarka Saboolnimada Federaalka (FPL). Heerarka Dakhliga waxaa lagu habbaynraa sanad kasta iyadoo kus alaysan isbeddelada FPL.

## Imisa ayay joogtaa Medicaid?

**Lacagta caymisyada Billaha:** Ma jiraan lacagta caymiska bil-laha oo Medicaid.

**Qarashka la Wadaagayo:** Adeegyada qaarkood sida waafaqsan Medicaid waxay u baahantahay lacag bixin yar ee caymiska, laakin waxaa jiro waqtiyada qaar markii aanan loo baahneyn lacag bixinta caymiska.

Inta ugu badan ee waligaa aad ku isticmaaleysid lacag bixinta caymiska sida waafaqsan Medicaid oo hal sanno waxay noqoneysaa \$200.

Wixii liiska Su'aalaha Inta badan La isweydiyo iyo Jawaabaha ku saabsan Medicaid, booqo: [http://www.health.ny.gov/health\\_care/medicaid/](http://www.health.ny.gov/health_care/medicaid/)